Aan eegno dhanka
XANAANADDA ILMAHA!

Hagaha Qoysaska ee Xanaanadda Ilmaha (Kindergarten) ee Iskuuladda Deegaanka Robbinsdale (Robbinsdale Area Schools)

Iskuuladda Deegaanka Robbinsdale (Robbinsdale Area Schools) ama (Rdale) waxa ay ugu baaqayaan fursado qaali ah ardaygaaga. Kuwaa waxaa ku jira hawlo wax qabad la taaban karo oo ah dhanka afka, farta, xisaabta, sayniska, farshaxanka, muusiga, iyo caafimaadka iyo fayoobida, iyo koridda dhanka jirka. Casharaddo badan oo fasaladda lagu qaato ayaa waxa ay abuuraan jawi waxbarashado oo xiiso iyo jeclaysiba leh.

Kolka ilmahu ay bartaan inay naxariis yeeshaan, ay saaxiibo sameystaan ayna wada jir u wada shaqeeyaan, waxa ay kororsadaan xirfado aasaas ah oo ay ku sii dul-dhisi xirfado kale dhamaan sannadaha ay iskuulka ku jiraan.

ROBBINSDALE
Area Schools



DIYAAR...



Barnaamijyadda Waxbarashada Hore ah

Barnaamijyadda Waxbarashada Hore ahi waxaa loogu talagalay inay ababiyaan ardaygaagga ayna dhaliyaan muxubo waxbarasho. Iskuuladda Deegaanka Robbinsdale (Robbinsdale Area Schools) waxa ay fidiyaan waxbarid qaali ah oo bisha bayaaminisana fursadaha waxbarasho ee u diyaarka ah ardaygaagga.

Barnaamijyadda Waxbarashadoodda Hore ee Iskuuladda Deegaanka Robbinsdale (Robbinsdale Area Schools) waxa ay fidiyaan waxyaabo badan oo kala duwan oo ay ku jiraan:

- **Fasallo Waxbarasho Hore ee Ilmanimaddada ah (ECFE) oo Qoyska la siiyo**
- **Labo-ilaa shan-cisho oo waxbarida ilmaha ah oo Iskuulka ka hor ah**
- **Xiisayaasha Hore**

Fadlan soo wac 763-504-4170 ama booqo barta **earlychildhood.rdale.org** si aad uga hesho faahfaahino.

Baarida Ilmaha ee Hore

Baarida Ilmaha waxaa u baahan gobolka Minnesota waana khasab in la sameeyo markay noqotaba mar ka hor inta ilmahaagu uusan bilaabin xanaanadda ilmaha (kindergarten). Da'da lagu taliyey in ilmahaaga la baaraa waa da'da 3½. Baarida bilaashka ahi waxa ay fidisaa fursad aad waji-waji ugu xiranto bare si aad ugala hadasho waxa ilmahagaagu ku fiican yahay, aad ku hesho akhbaar ku saabsan gudoonka waxbarashada, khayraadyadda beesha ka jira, aadna ku waydiiso su'aalo ku saabsan waalidnimadda ama iskuulka. Qoysasku waxa ay qabsan karaan balan iyaga oo soo waca khadka 763-504-4180 ama waxa ay booqan karaan barta rdale.ce.eleyo.com.

Ilmaha waxaa laga eegaa:

- Xirfadaha xagga murqaha iyo itaalka
- Hore-u-kaca dhanka hadalka iyo afka
- Garaadka iyo horukaca ijtimaaciga ah
- Aragga iyo maqalka
- Dherarka iyo miisaanka
- Talaaladda

HAGAAG...

Isqorida Xanaanadda Ilmaha (Kindergarten)

Iskuuladda Deegaanka Robbinsdale (Robbinsdale Area Schools) waxa ay ugu fidiyaan dhamaan ardayda xanaanadda ilmaha maalintii oo dhan ah iyadoo lacag la'aan ah sideed iskuul oo dugsiyadda hoose ee xaafadaha iyo sedex iskuul oo kuwa gooni-sooca ah (magnet iskuul). Iskuuladda gooni-sooca ah (magnet school) waxa ay ku bixiyaan waxbarasho buuxda iskuulka oo dhan iyagoo diiradda saara, farshaxanka, sayniska, ama wax-ku-barasho afka-Isbaanishka. Adeegso iskuul helahayaga shabakadda (website) si aad u hesho iskuulka xaafadaada ama codso Iskuuladda gooni-sooca ah (magnet school). Iskuulka xaafadaada ayaa lagugu qori iyadoo la eegayo ciwaanka gurigaaga — kani waa kaaga "Iskuulka deegaanka ee aad dhigaynayso." ardayda Iskuuladda gooni-sooca ah (magnet school) waxaa lagu xushaa nidaam bakhtiyaa-nasiib ah oo cid walba u furan. Foomamka is-qorida xanaanadda ilmaha (kindergarden) iyo iskuul helaha waxa ay ku jiraan barta (online) ee **rdale.org/kindergarten.**

Waa aanu jecelnahay caruurta waxa aana ku Boorinaa Waxbarashada

MAALMO IYO WAQTIYO KAMA DAMBAYN AH OO MUHIIM AH

Ilmaha shan jirka ah bisha Semtember 1, ama ka horba waxa ay xaq u leeyihiin laguna dhiiri geliyaa inay is qoraan xanaanadda ilmaha (kindergarden) sannad dugsiyeedka. Codsiyadda Iskuuladda Gooni-sooca ah waxaa la iska rabaa bisha Deseember ee sannad ka hor sannadka ay ilmahu bilaabaan xanaanadda ilmaha (kindergarden). Is-diiwaangelinta iskuuladda xaafaddaha waa in la soo dhameeyaa ka hor xilliga kulaylaha (summer). Ka hel is-diiwaangelinta khadka (online) ka ee barta **rdale.org/enroll.**

Nofeember 3: Codsiyadda iskuulada Gooni-sooca ah (Magnet school) ayaa diyaar noqon

Deseember 19: Codsiyadda iskuulada Gooni-sooca ah (Magnet school) ayaa la iska rabaa;

Janaayo 7: Waxaa lagu dhawaaqaa natiijooyinka bakhtiyaa nasiibka ee iskuulada Gooni-sooca ah (Magnet school)

Maajo: Akhbaarta xanaanadda ilmaha (kindergarden) iyo habeenka is-diiwaangelinta ayaa lagu qabtaa iskuuladda xaafadaha

Agoosto-Sebteember: Habeenadda imaanshaha/akhbaar bixinta ee dugsiyadda hoose

Kolka aad diyaar u noqoto diiwaangelinta, waxa aad u baahnaan doontaa inaad soo dhamaystirto Ilmahaaga Baaridiisa Ilmaha ee Hore.

SOCO!



Habeenka bixinta akhbaarta Xanaanadda Ilmaha (Kindergarten)

Iskuuladda xaafadahu badanaa waxa ay qabtaan habeenadda akhbaar-bixinta bisha Maajo. Iskuuladda gooni-sooca ahi (magnet schools) waxa ay qabtaan kulanadda akhbaar bixinta bisha Nofeembar. Xlliga kulanadaa, ardayda iyo qoysaskoodaba waxa ay booqan iskuulka, la kulmaan maamulaha, waxaana la siiyaa liiska sahayda iskuulka ee la rabo, waxa ayna ogaan waxa la iska filayo ee kolka ay noqoto barnaamijka xanaanadda ilmaha. Kala soco maalmaha iyo waqtiyadda barta **rdale.org/kindergarten**.

Gaadiidka Baaska

Gadiid waa la siin ardayda haddii:

- Ay dhigtaan iskuulka xaafadooda ayna ku nool yihiin meel in u jirta 8/10 mayl iskuulka.
- Ay ku nool yihiin deeganka gudoonka ayna dhigtaan iskuul gooni-sooc ah (magnet school). Maadaama ardaydu ay ka yimaadaan gudoonka oo dhan, baaska geynaya ama ka soo qaadaya iskuuladda gooni-sooc ah (magnet school), muddo ka dheer kuwa iskuuladda xaafadaha ayey ardaydu saarnaan karaan.

Barnaamijka Adventure Club ee Haynta Ilmaha ah ee ka Hor iyo ka Gadaal Iskuulka ah

Barnaamijka Adventure Club waa barnaamijka ka hor iyo ka gadaal iskuulka ah ee haynta ilmaha ee Iskuuladda Deegaanka Robbinsdale (Robbinsdale Area Schools). Barnaamijka Adventure Club waxaa la furaa 6:30 subaxnimo (a.m.) waxaana la xiraa 6 fiidnimo (p.m.) maalmaha iskuulka. Ardayda barnaamijkani waxa ay bartaan la dhaqanka dadka kale iyagoo isla markaana baranaya xarakaad jireed, saynis iyo hawlo cunto karin ah, farshaxan, farsamo-gacmeed iyo waqti dabad ku qaadasho. Wixii kale ee akhbaar ah ee dheeraad ah ama si aad isu qorto barnaamijkan fadlan booqo barta **ced.rdale.org**.

Xarunta Is-qorida

Telefanka
763-504-8080

Emayl
enrollment@rdale.org

Ciwaanka
4148 Winnetka Avenue North
New Hope, MN 55427

Saacadaha
Isniin ilaa Jimce,
7:30 subaxnimo (a.m.) - 4 fiidnimo (p.m.)

Waxaad kaloo u baahnaan doontaa:

- **warqada dhalashada ee ardaygaaga**
- **cadeyn ah ciwaanka gurigaaga**
- **sqorida khadka (online) ah ee K-12,oo dhamaystiran, talaaladda/qoraaladda caafimaad**

Xarunta Is-qorida, waxa aad ka ogaan kartaa, arimaha baasaska iyo dhanka gaadiidka ah; walaacyada dhanka caafimaadka iyo talaaladda; manfacyadda waxbarashada; iyo qiimeynaha Adeegyadda Bartaha Afka-Ingiriiska.

TALAALADDA

Dhamaan ilmaha dhiganaya iskuuladdu waa khasab inay u hogaansamaan sharciga Talaaladda ee Minnesota [Minnesota Immunization Law (MS 121A.15)] ee u baahan talaaladda:

Qaamaa-qashiirka (Diphtheria), Teertanada (Tetanus), iyo Jexdheerta (Pertussis) (DTap, DTP, DT)

Dabaysha [Polio (IPV, OPV]

Jedeeco (Measles), Qun-bararka (Mumps), iyo Jadeeco Jarmal [Rubella (MMR)]

Cagaarshowga [Hepatitis B]

Busbuska [Varicella (furuqa]; labo kuuro ayaa la iska rabaa)

YArdaygaagu ma uu awoodi doono inuu dhigto iskuul ilaa iyo inta uu ka soo baxayo shuruudaha sharciga. Waalidiinta/Mas'uuliyiinta waxaa dhici karta inay u heli karaan waxa la yiraa ka reebida sharci ah sababo caafimaad ama kuwa caqiido awgood.



Ma aan sugi karno inaad ku soo dhaweyno ardaygaaga Rdale! Qasdigayagu waa inaan dhiirigelino aana waxbarno dhamaan ardayda oo dhan si ay u horukiciyaan karitaankooda u gaarka ah ayna si wacan wax u taraan beeshooda.

Rumayn. Ka Mid Ahaan. Noqosho.



ROBBINSDALE
Area Schools